# Dareemayaasha

## Adduunyo wada dareen ah

Ka  hor inta aanay nooluhu jirin caalamka , adduunku wuxu ahaa aduun aragtiyo iyo dareemo ka buuxaan. Qorraxdu waa ay ifaysay oo iftiiminaysay dhagxaanta, daruuraha iyo baddaba. Fulkaano ayaa soo burqanaysay dareere kulul oo holcaysa oo lava loogu yeero keentayna hugac iyo dhulgariir, samadana u tuurtay urta neefta svovel. Mowjado biyaha badda ah ayaa us oo jabayey xagga xeebata, dabayshuna waxay xaadhaysay buuraha dushooda. UUn keenana waxa ka jiray araktiyo, maqallo, ur, dhadhan, iyo dhaqdhaqaaqyo ka hor intii aanay iman cid dareentaa ama nololiba iman.

Noolihii u horeeyey ee yimid dhulkeenu waxay ahaayeen unugyo aad u yaryar oo aan lahayn dareemayaal ay wax ku dareemaan, Laakiin ka dib waxa imaaday noolayaal ungyo badanle ah oo bilaabay in ay yeeshaan dareemayaal. Noolaha qaar waxy bilaabeen in ay yeeshaan unugyo ay ku ogaan karaan iftiinka. Unugyadani waa bilowgii indhaha aan wax ku aragno. Noolayaasha qaarna waxa laga yaabaa in ay lahaayeen unugyo dhadhanka macaan ay ku dhadhamiyaan ama ay lahaayeen unugyo ay ku ogaadaan haddii la tuujiyo. Kuwani waa biqilkii ugu horeeyey ee dareemayaasha dhadhanka iyo taabashada.. Ka dib noolayaasha qaar waxay yeesheen unugyo ay ku ogaadaan codka dheer ama ay ku ogaadaan urta. Tanna waxay ahayd bilowgii dareemayaasha maqalka iyo urta.

Cidina ma oga dareemihii ugu horeeyey ee nooluhu yeesho, laakiin waxa cad in dareemayaashu yihiin wax nolosha noolaha muhiim u ah. Noolaba noolaha u uka dareen badanyahay wuu ka cunto helis wanaagsanaa, waa uuka dagaan wanaagsanaa, waanu ka khatar ogaan ogaa. Malaayiin sanno ayey horumar samaynayeen ama korayeen dareemayaashii u horeeyey ilaa ay ka noqdaan aalado aad u wanaagsan.

Indho waxa arka, dhego wax maqlq, san wax uriya, carrab wax dhadhamiya iyo unugyada maqaarka een ku dareenno taabashada, kulaylka iyo qabowga.

Waqtigan hadda ah xayawaanka oo dhami waxa ay leeyihiin dareemayaasha aan kor ku soo sheegnay oo ay ku ogaadaan waxa ku xeeran.

## Waa maxay sababta aan u leenahay dareemo badan?

Addunka waxa jibaaxaya noocyo calaamadao ah oo kala duwaan, oo inoo sheegaya waxa dhacaya. Dareemayaasheenu waa aalado qiyaasa calaamadahani. Markaasay soo diraan farriin ku saabsan calaamadihii ay heleen iyagoo soo dhex marinaya dunaha neerfayaasha ee ku dhamaada maskaxda.

Dareeme kasta waxa loo sameeyey si khaasa si uu u qiyaaso calaamadda loogu talagalay inuu qiyaaso sida: dhawaqa. iftiinka, urta, dhadhanka, iyo taabashada.

### Indhuhu waxay dareemaan iftiinka

Marka iftiinka qorraxda ama laambaddu la kulanto walax ama shay kuu dhow, falaaraha iftiinka badankoodu dib ayey uga soo noqonayaan. Qaar ka mida ilayskii dib usoo noqday ayaa la kulmaya ishaada. Iftiinkani waxuu samaynayaa ishaada dhexdeeda musawir waxyaalaha kuu dhowdhow ah.

## Dareenka taabashadu waxa uu ogaadaa salaaxa,qabowga kulaylka

Maqaarku waxa uu leeyahay xubno dareen oo badan. qaarkood waxay ogaadaan kulaylka ama qabowga. Kuwo kalena waxay ogaadaan gariirka, ama tuujiska. Unugyada dareenku oo dhami waxa ay u diraan maskaxda fariimo ku saabsan waxa ay la kulmeen. Sidaa ayaanad ku ogaataa dabaysha kulul, dharka markaad gashato aad is cuncunto, ama musbaarka ku muday. Laakiin jirka qaybtee ayey unugyada dareenku ugu badanyihiin ayaad u malaynaysaa?



*Sawirka 1aad Taabashada. Xigasho:Adobe Stock*

## Maqalku Waxa uu ogaadaa mowjadaha dhawaqa

Dhawaqu waa nooc mowjad ah oo hawada ku jira. Waxa ay u egyihiin mowjadaha samaysma marka aad dhagax lu tuurto biyo taagan guudkooda. Marka dhawaq la sameeyo, mowjadaha dhawaqu wuxu u baahaa dhinac kasta. qaar waxay ku dhacaan dhegtaada iyagoo unugyo yaryar oo gudaha dhegtaadaha

### Dhegta iyo maqalka

Waxa dhagaha kuwa inoo sahla in aan ogaano dhawaaqa ka ama imanaya gaariga xamuulka ah ee guuxaya ama kaneecda ciyiysa. Dhegaha gudaheedu waxa ay u muuqdaan in ay qalqaloocaan, laakiin qayb kasta oo ka mid ahi waxa ay muhiim u tahay in maqalku shaqeeyo.

### Øremuslingen ama carjowda dhegta

Carjowda dhegtu waxa ay u egtahay masaf duuduuban, oo soo qabtamowjadaha dhawaqa oo usii dira gudahakanaalka dhegta.

### Trommehinnen ama xuubka durbaanka

Mowjadaha dhawaqa ee dhax heehaabaya kanaalka dhegtu, way isbadalaan marka ay gaadraan xuubka gurbaanka. Xuubka gurbaanka waxa loogu bixiyey waxa uu shabahaa saanta saaran gurbaanka. Marka dhawaqu la kulmo xuubka durbaanka, waxa uu bilaabaa inuu gariiro, sida durbaanku u gariiro marka aan garaacno.

### Buegangene ama marinno-qaanseedyo

Marina-qaanseedyada looma isticmaalo in wax lagu maqlo , laakiin waxa loo isticmaalaa in lagu ogaado sida madaxu u dhaqdhaqaaqo. Gudaha marinno-qaanseedyada waxa ku jira dareere iyo unugyo yaryar oo timo ah. Marka aad madaxa dhaqaajiso, dareeruhu waxay ku soo qulqulaan marino-qaanseedyada, si ay timuhu hor iyo gadaal ugu lulmaan. Markaas ayey unugyada neerfuhu fariin u diraan maskaxda. Macloomaadkan ayaa kuu sahla in aad isha ku hayso waxa aad fiirinayso, xataa haddii aad dhaqaajiso madaxa. Meel kale oo ka mida qolaøka

dhegta waxa kujira unugyo ogaada waxa sareeya iyo waxa hooseeya. Waxa ay lagama maarmaan u yihiin in miisaanka.

## Sneglehuset ama guriga alaalaxayda


Stigbøylen ama salaan- dhaqaaqa waxa uu ku dhajisanyahay darbiga khafiifka ah

ah guriga alaalaxayda. Marka mowjadaha dhawaqu ay ka gariiriyaan salaan-dhaqaaqaha, dareeraha ku jira guriga alaalaxayda ayaa bilaaba inuu lulmo. Gudaha guriga alaalaxayda waxa fadhiya kumaankun ungyo-dareeno timo leh. Waxanay bilaabaan in ay sabeeyaan iyaga oo fariin u diraya maskaxda oo usheegaya sida ay timuhu u lulmayaan. Sidaas ayey maskaxduna ku ogaataa nooca dhawaqa ah ee ka dhacaya madaxa banaankiisa.

## Buruska ama dubbaha, amblten iyo stibøyen

Banaanka xuubka durbaanka waxa ku yaalla seddex lafood oo yaryar oo lakala yiraahdo hammeren, ambolten og stigbøylen.Marka mowjadaha dhawaqu ay ka gariiriyaan xuubka durbaanka, ayey lafaha yaryari bilaabaan in ay lulmaan. Marka hore waxa lulma dubbaha ama bruska, waxa ku xiga ambultanka waxana ugu danbeeya stigbøylen.

Maroodigu wuxu ku wada hadlaa dhawaq infralyd oo ah dhawaq culus oo dadku aanu maqli karin halka fiid meertu iyadu leedahay dhawaq la dhaho ultralyder ama dhawaq qafiif ah oo dadku aanu maqli karin.





*Sawirka 2aad, maqalka. Xigasho: Adobe Stock*

## Dhawaaqyada dhagaheena waxyeeleeya.

Dhagteenu waxay maqli kartaa dhawaaqyo yar, laakiin waxay kale oo la qabsataa si ay ugu adkaysato dhawaqyada waaweyn qaarkood sida baabuurta, muusiga iyo hugacaba.Laakiin dhegtu uma adkeysato dhawaq kasta. Waxa jira laba dhawaq oo khatar u ah dhegta. Dhawaqa xabadda ama madfaca ee degdeg ku soo gaara iyo dhawaqa dheer ee socda ama dheguhu maqlaan waqti dheer. Dhawaqyada noocaan ahi waxay wax yeelaan unugyada timaha ee guri-alaalaxayda dhegta gudaheeda ku yaalla.Waxanay sababtaa in wax maqalka dhegtu xumaado lana dawayn kari waayo.

## Baaxadda dhawaqa

Dhawaqa waxa lagu cabitaa desibel. Dhawaq cabirkiisu yahay 10 desibel aad ayuu u hooseeyaa oo dirqi ayaad ku maqli kartaa, halka guuxa diyaaradda mashiinkeedu gaarayo cabir dhan 120 desibel. Shaxda hoose waxad ka akhriyi kartaa inta cabirka desibel ee ay dhawaqyo kala duwani leeyihiin. Midabka gsduudku waxa uu muujinayaa marka dhwaqu gaaro mid dhagaha wax yeelaya.




*Sawirka 3aad, dhawaqa. Xigasho: Adobe Stock*


## Jaangooyada Disebel

| Disebel | Isha dhawaqa |
|---|---|
| 170 desibel | Dayax gacmeed cirka loodirayo dhawaqiisa. |
| 150 desibel | Xabad qori oo agtaada laga riday. |
| 120 desibel | Diyaarad mashiinkeed. |
| 100 desibel | Baaruudda dhawaqeeda. |
| 90 desibel | Guuxa baabuur kuu dhow. |
| 80 desibel | Mashiinka wax lagu xaaro |

| Disebel | Isha dhawaqa |
|---|---|
| 50 desibel | Hadaka caadiga ah. |
| 20 desibel | Xashaashaqa. |
| 10 desibel | Neefta dadka |
| 0 desibel | Xadka codka daku maqli karo. |

## Dareenka dhadhanku waxa uu ogaada walxaha ku jira biyaha.

Qaar ka mid ah walaxaha kimikada ah ayaa waxa ay leeyihiin karti ka dhigta in ay macaanyihiin, in ay dhanaanyihiin, ama ay qaraaryihiin marka ay ku milmaan biyaha ama candhuufta. Qaybta sare ee carrabka waxa fadhiya unugyada dhadhanka ee dhadhamin kara dhadhanada aan kor ku soo sheegnay.




*Sawirka 4aad, dhadhanka. Xigasho: Adobe Stock*

Shanta dhadhan ee guud.

1. Macaan
2. dhadanka cusbada
3. dhanaan
4. qaraar
5. dhadhanka hilibka ama jiiska.

Dhadhanku waxa uu inaga caawiyaa in aan ku ogaano fiitamiinada, nafaqooyinka iyo waxyaalaha sunta ah.

Dhadhanka macaanku waxa uu inoo sheegaa in sheyga aan ka dhadahamino sonkori ku jirto. Waan u baahanahay cusbada, laakiin haddii aan wax badan cunno cafimaadkeenna ayey khatar u tahay  sidaa darteed waa muhiim in dhadhanku noo sheegaa inta cusbo ah ee jirka ku sii socota. Qaraarka iyo dhanaanku waxa ay inoo sheegan wixii sun ah ama khatar ku ah jirkeena iyo caafimaadkeena.

## Dareenka urtu waxa uu ogaadaa walxaha hawada ku jira.

Urtu waa molokuyuulo ka soo furmay walax oo dhex heehaabaya hawada. Sanka gudihiisa waxa ku yaal malaayiin unugyo ah oo ogaan kara molokuyuulada kala duwan ee sabaynaya hawada dhexdeeda. Marka urta molokuyuul ubax ah ama ayga xaarkiisu uu la kulmo unugyada urta ee sanka, unugyadu waxay maskaxda u diraan farriin ku saabsan waxa ay uriyeen.



*Sawirka 5aad, Urta. Xigasho: Adobe Stock*

### Kumanaan urood ayaa jira

Sanka dadku  waxa uu leeyahay ilaa 300 oo nooc oo unugyo dareen ah oo kala duwan, oo mid kastaaba uriyo ur gooni ah. Laakiin waxan urin karnaa kumaankun urood oo kala duwan.


### Waxan wax ku dhandhaminaa sanka.

Marka aan rabno in aan ogaano sida walaxi dhandhamayso  waxan isticmaalaa dareenka dhadhanka. Laakiin carabku waxa uun uu garan karaa dhadhamo kooban. Sidee ayaad markaa ku kala garan kartaa cabitaanka tufaaxa ah iyo cabitaanka bringebærka ah ee la bada macaan iyo dhanaan aad ka dhedhaminaysid. Run ahaantii waa sanka ka inoo sheega noocyo badan oo dhadhan ah. Marka aad kabato kabasho cabitaan ah dareemaha dhadhanka ayaa inoo sheega in cabitaanku macaan iyo dhanaan isku jira yahay laakiin waa sanka ka inoo sheega urta ay leeyihiin walxaha cabitaanku ka koobanyahay.

## Isha iyo aragtida

Qorraxda iyo misbaaxyada kale waxa diraan falaaro ilaysyo badan oo ku dhaca walxaha kugugu wareegsan. Qaar kamida ilayskani waxa ay ku dhexdhumaan walxaha ay la kulmeen kuwo badanina dib ayey walxaha uga soo noqdaan oo ku dhacaan ishaada. Ishaadu waxa ay

leedahay malaayiin unugyo dareeno ah oo qabta ilayska. Marka unugyadani ay qabtaan falaaraha-ilayska, ayey waxay maskada u diraan farriin iyaga oo marinaya dareemayaal dun ah oo ka baxaya isha. Marka ay maskaxdu isku gayso fariimaha ka kala yimid unugyo badan ayaa waxa soo baxa sawir waxa aad fiirinayso ah.



*Sawirka 6aad, aragga. Xigasho: Adobe Stock*

## Sidan ayey ishu u shaqaysaa

Xuub-qaansoroobeedka midabada bani wuxu badalaa baaxadda bu,dda, si ilays xadidani usoo galo isha. Haddii ilaysku yaryahay, xuub-qaanso roobaadku wuu isku soo ururaa taasi oo sababta in bu,du kala baxdo. Haddii uu ilaysku badanyahay, xuub-qaansoroobeedku wuu kala baxaa taasi oo sobobta in bu,du isku soo ururto,

Dhalo-dreere waa jelly dhalo oo kale ah oo buuxiya isha gudaheeda.

Wiilku waa dariishad dhalo ah oo difaacda isha. wiilku waxa uu u qaloocaa sida qaansda oo kale si uu u qaloociyo falaaraha ilayska xagga hore ee darbiga isha.

Bu,du waa daloolka ilaysku isha ka soo galo.

xuubka-shabaqa ah waxa uu daboolaa derbiga gadaale ee isha.

Halkaan waxa ku yaalla unugyada dareenka ee ogaada ilayska.

Dunta dareemayaash waa dareemayaal dunta u eg oo fariimaha gaarsiiyaan maskaxda.

Xididka xuubka waxa uu leeyahay xididda yar yar ee dhiigga oo gsijiinta iyo nafaqo keena unugyada.

Xuub-seedeedka  waa xuub buuran, adag oo difaaca isha gudaheeda.

Bikaac ururiye waxa uu qaloociyaa falaaraha si ay ugu dhacaan halka loogu talagalay ee xuub-shabkeedka. Waxa uu sababaa in aan si cad u aragno meesha aan isha ku fiiqayno.

Bikaac ururisado way badashaa qaabka. Waa muhiim si ay ishu usamayso sawiro fasiix ah meelaha dhow iyo meelaha ka fogba.

## Laylis

1. Jirkeenu waxa uu leeyahay qalab uu iftiinka ku arko magacood?
2. Qabtee jirka ayaan ku dareenaa taabashada iyo kulka?
3. Maxaa la dhahaa dhawaqa aad u khafiifka ah ee dadku aanu maqli karin?
4. Ma runbaa in dhektu la qabsato dhawaqa dheer?
5. Shantee dhadhan ayaan dhedhemin karnaa?
6. Dhadhankee ayaa inooga diga suntan?
7. Ilaa imisa ur ayaa daku urin karaan.?